Westerville City School District

Kindergarten Registration

CARRUURTA WAA INAY AHAADAAN 5 SANO JIR SETEEMBER 30, 2022 AMA KA HOR INTAAN LA GAARIN

Carruurta waxaa looga baahan yahay iney iney soo dhigteen fasalka xanaanada carruurta ka hor inta fasalka koowaad aysan gelin. Haddii ilmahaaga uu shan jirsado 30ka bisha Seteember, 2022 ama ka hor, fasalka xanaanada ayaad ku lagu qori karaa.

Degmada Dugsiga Magaalada Westerville waxaa laga helaa Xanaanada Maalinta oo dhan. Barnaamijka Xanaanada Maalinta dhan waxaa heli kara qoysaska daggan gudaha xuduudda tagidda dagmada. Ku meelaynta Maalinta dhan Dugsiga xanaanada waxa go'aamiya bakhtiyaanasiib, maadaama ay kuraas kooban ay ka banaan yihiin barnaamijka. Waalidiintu waa inay muujiyaan xiisaha ay u qabaan Maalinta oo dhan Dugsiga Xanaanada marka ay buuxinayaan codsiga diiwaangelinta onlaynka ah si loogu daro bakhtiyaanasiibka. Kharashka Waxbaridda Dugsiga xanaanada Maalinta oo dhan waa $3000 sanad dugsiyeedka. Kaalmada waxbarashada waxaa loogu talogalay kuwa xaqa u yeesha. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan Dugsiga xanaanada maalinta oo dhan ah, fadlan booqo www.wcsoh.org/ADK.

Habkeena diiwaan gelinta waxaa loo sameyay in la daboolo baahida waalidiinta loona gaaryeelo waayo-aragnimadaan. Fadlan wac Xarunta macluumaadka Qoyska iyo Diiwaan Gelinta, (telefoonka 614-797-7700) haddii aad qabtid su'allo ku saabsan diiwaan gelinta xanaanada.

Haddii ilmahaagu uu hadda dhigto barnaamijka iskuulka-kahor ee Dugsiyada Degmada Westerville ee ELC, **uma** baahnid in dib aad isugu qorto Iskuulaadka Degmada Westerville, inkastoo aan kugu dhiirigelinnayno inaad soo degsato qoraallada ku qoran barta www.wcsoh.org/kindergarten si aad wax ugu fahamto fursadaha iyo waxqabadka la xiriira xanaanada. Nuqullada adag ayaa laga heli doonaa dhismo kasta oo dugsi hoose iyo Xarunta Waxbarashada Hore/Xafiiska Maamulka ee 936 Eastwind Dr.

SHURUUDAHA DIIWAANGELINTA ILMAHAAGA

Talaabada 1aad: Soo ururi dhammaan **dukumeentiyada** loo baahan yahay:

1.* Shahaadada Dhalashada asalka ah;
2. Aqoonsiga sawirka ee waalidka/masuulka sharciga ah;
3.* Laba (2) cadaymo oo muujinaya degaanka;
4.* Diiwaanada talaalka la cusboonaysiiyay:
5.* Dukumentiyada Asalka ah ee Maxkamadu oo Shaabadaysan ee Furriinka/Haynta (haddii ay tani khusayso xaaladdaada) WAA INAY noqdaan kuwo maxkamadu saxiixeen oo taariikhda/wakhtiga ku shaabadaysan;
6. Natiijooyinka baaritaanka TB-da ee lagaa waayay haddii ilmahaagu ku dhashay meel ka baxsan Mareykanka (sida #6)

* Fiiri sharraxaadda bogga 3 ee ogeysiiskan shayga 1, 3, 4 iyo 5

Talaabada 2aad: Buuxi codsiga diiwaangelinta onlaynka ah oo **ku dar ciwaanka iimaylka ee hadda shaqeeya ee qofka mas'uulka sharciga ah.**

Talaabada 3aad: Dhammaadka codsigaaga onlaynka ah, fadlan **ballan qabso**. Sababtoo ah ma jiro kulan fool-ka-fool ah, ballantani waxa ku wargalinaysaa kooxdeena in uu jiro codsi firfircoon oo diyaar u ah in laga shaqeeyo. Haddii aad diiwaangelinayso in ka badan hal arday, fadlan u samee ballamo dheeraad ah arday kasta si aad ugu oggolaato wakhti ku filan ka shaqaynta.

Fadlan ha soo wicin Xarunta Diiwaangelinta haddii aadan awoodin inaad ballan sameysato labada toddobaad ee ugu horreeya gudahooda ~ ballamo dheeraadka ah ayaa sii socon doona in lagu bixiyo inta lagu jiro nidaamka diiwaangelinta labada bilood.

Marka aad qabsato ballantaada, fadlan dib ha u dhigin, waayo beddelidda waxay dib u dhigaysaa ka shaqaynta diiwaangelintaada.

Fadlan la soco in ballantaadu noqon doonto mid lagu wada xiriiro iimaylka kaliya - ma iman **DOONTID** goobteena OhioHealth maadaama xafiiskeenu weli xidhan yahay.

Talaabada 4aad: Waxaad iimayl ka heli doontaa qof ku Takhasusay Diiwaangelinta wakhtiga ama ka hor taariikhda ballanta diiwaangelintaada.

Talaabada 5aad: Dukumeentiyada loo baahan yahay waa in si toos ah loo soo galiyaa qaynta codsiga diiwaangelinta onlaynka ah AMA iimayl loogu soo diro Khabiirka Diiwaangelinta kaas oo kula soo xidhiidha si aad u dhammaystirto diiwaangelinta.

Codsigaaga waa in lagu buuxiyaa 30 maalmood gudahood si looga fogaado in la tirtiro hawl-la'aan darteed.

Haddii aadan ogeyn iskuulka canugaaga uu tagayo, waxaad soo wici kartaa dugsiga hoose ee dugsiyada magaalada Westerville ama Xarunta macluumaadka Qoyska ka wac 614-797-7700. Sidoo kale waxaad booqan kartaa boggeena internetka oo ah www.wcsoh.org.

Dugsiga xanaanada 101 waxa la heli karaa laga bilaabo

Arbacada, Janaayo 5 @ 5 galabnimo.

Dugsiga xanaanada 101 waa bandhig ay soo jeedinayaan maamulayaasha iyo macalimiinta dugsiga xanaanada. Ujeedada bandhiga ayaa ah in lagu wargaliyo waalidiinta habka loo diiwaan geliyo ilmahooda Xanaanada, waxbaridda waalidiinta maalinta caadiga ah ee Xanaanada iyo waxa laga filayo Caruurteena la xanaaneeyo inta lagu jiro sannad dugsiyeedka.

Fadlan booqo boggeena internetka www.wcsoh.org/kindergarten oo aad ka heli kartid muuqaallo iyo xog dheeraad ah.

SHARRAXAAD KU SAABSAN HUBINTA QODOBADA #1, #3, #4, & #5

#1 – SHAHAADADA DHALASHADA

- Shahaado dhalasho oo asal ah

Haddii shahaadada dhalashada aan 14 maalmood gudahooda lagu keenin laga bilaabo maalinta lagu qoray, maamulaha/qofka loo xilsaaray waa inuu ogeysiiyaa Waaxda Adeegyada Maamulka, kuwaas oo iyagana ku wargelin doona hay'adda sharci fulinta ee ka howlgala meesha ardayga uu degan yahay in ardayga laga yaabo inuu yahay ilmo la la'yahay.

#3 –LABO (2) CADDEYN DAGGANAANSHO

Caddeynta waxay muujineysaa in qofka uu daggan yahay Dagmada Dugsiga Magaalada Westerville 7-maalin -todobaad kiiba iyo in uusan dagganaasho ku lahayn meel kale.

- *Caddeynta la soo gudbiyay waa ahaataa koobiyo la sameeyay ama sawirro la aqrin karo oo lagu daray arjiga*

Waxaad keentaa hal (1) caddeyn oo laga soo qaaday **A** iyo hal (1) caddeyn oo laga soo qaaday **B**:

A:

- **Iminka la Isticmaalo***– Heshiiska Ijaarka/Kirada marka magaca waalidka ku qoran yahay kirada (lagana reebi karo macluumaadka maaliyadda keliya), bogga saxiixa, iyo magaca milkiilaha hantida iyo nambarka telefoonka;
  Haddii kiradaada tahay bil ilaa bil, la kaalay kiradaas iyo caddeynta aad iminka haysatid (kuna qoran warqad rasmi ah), sida magaca maamulaha hantida iyo nambarka telefoonkiisa,* ***AMA*
- **Iminka la Isticmaalo** (ku taariikheysan 30kii maalmood ee ugu dambeyay gudahooda) Warqadda Deynta (Mortgage) oo lagu soo qoray magaca waalidka (lagana reebi karo macluumaadka maaliyadda keliya); **IYO**

B:

- **Iminka la isticmaalo** (taariikhda waa 30kii maalmood ee la soo dhaafay) Biilka Danabka Dadweynaha oo muujiya cinwaanka loo adeego, guri ku yaal Dagmada Dugsiga Westerville iyo magaca waalidka haaya/ilaaliyaha sharciga (sida Gaaska, Biyaha, Korantada, Telefoonka Dhulka, Kable, ama Internetka); **AMA**
- **Iminka la isticmaalo** (taariikhda 30kii maalmood ee la soo dhaafay gudahooda) Dirista Dawladda oo muujineyso cinwaanka Dugsiga Dagmada Westerville iyo magaca waalidka haaya cunugga/iaaliyaha sharciga (sida masaruufka cunugga, kaalmada dawladda)

#4 –MACLUUMAADKA SHURUUDAHA TALLAALKA

Waa in aad keentaa diiwaanka tallaallada (waxay noqon kartaa warqad Xafiiska Takhtarka lagaa soo siiyay). Xeerka Ohio ee dib loo hagaajiyay wuxuu shardi ka dhigayaa in lagaa helo caddayn tallaal oo aad keentaa 14 maalmood laga bilaabo marka iskuulka la bilaabo, ama ilmaha waxaa laga joojinayaa iskuulka.

TALLAALKA WAXAAD KA HELI KARTAA WAAXDA CAAFIMAADKA EE XAAFADDAADA
Westerville & Gahanna: 614-525-3719 Columbus: 614-645-7945 Delaware County: 740-203-2040

- DTaP/DT, ama tallaalka DT (Gawracatada, Xiiq-dheerta, Teetanada): 5 ta cirbid waa la iska doonayaa, aysan ka ahayn tallaalka 4aad oo la siin karo marka afar sano ay u gasho ama ka dib.
- IPV (Dabaysha): 3 cirbad ama in ka badan ayaa loo baahan yahay; cirbadda ugu dambayso waxaa in la siiyaa marka afar sano ay u gasho ama wixii ka dambeeyo.
- MMR (Jadeecada, Qanjirro bararka, Jadeecada loo yaqaano Jerman): 2 cirbad ayaa loo baahan yahay; cirbad 1aad waxaa la siiyaa marka afar sano ay u gasho ama wixii ka dambeeya.
- HEP B (Cagaarshow B): 3 cirbad ayaa loo baahan yahay, waxaa dhici karta in 6 bilood ayay qaadato in la dhammaystiro.
- VARICELLA (tallaalka cudurka bus-buskal) ama taariikhda cudur: 2 cirbad ayaa loo baahan yahay, ciradda 1aad waxaa la siinayaa ama marka hal sano jirsado ama marka wixii ka dambeeya. Haddii ardaygu yahay arday cudur ku dhacay, takhtarka ama waalidka ayaa dhici karta in caddaynta/taariikhda ay soo sheegaan.

#5 – WARQADAHA FURIINKA/HAYNTA (Haddii tani quseeyso xaaladaada) – **waa in** maxkamadda soo saxiixdo kuna soo shabadeyso taariikhda:

- Go'aanka Furiinka Kama Dambayska, ee laga yaabo in lagu soo darro Qorshaha Qeybsiga Waalidka lana magacaabo waalidka guriga ku haayo cunugga si logu meeleeyo dugsiga; ama
- Wakaaladda la siiyo Awoowaha/Ayeeyada; ama
- Ammarka Haynta ku Meelgaarka ee magacaabo ilaaliye gaar ah; ama
- Wakaaladda la siiyo Militariga

HADDII AAD OGTAHAY, AMA AAD TUHUNSAN TAHAY IN UBADKAAGA YAHAY ARDAY NAAFO AH, LA SOO XIRIIR DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE XAFIISKA WAAXDA WAXBARASHADA GAARKA AH [SPECIAL EDUCATION] 614-797-5900.